

QAAMUUSKA SINAANTA IYO WAXBARASHO FIICAN

1. **Xaqiijin*:** Waxbarida iyo qalabyada waxbarista ee ixtiraamaayo iyo qiraayo aqoonsiga qowmiyadeed, jinsiyadeed, iyo luqadeed ee ardayda iyo waayo aragnimadooda hada iyo kuwa taariikheed ee ku jiro macnaha guud ee shaqada heerka fasalka.
2. **Cunsur diid:** Qof ama dhaqan sameyn ay ka go'an tahay aqoon raadis, milicsi, iyo ficil joogto ah si bareer ah ugu soo horjeesto cunsuriyada.
3. **Jawaab dhaqan ahaan:** Lahaanshaha ka warqabka aqoonsiga dhaqameed ee qof iyo aragtiyada ku saabsan kala duwanaanshaha, iyo awooda uu u leeyahay inuu wax barto oo uu ku dhiso caadooyinka dhaqanka iyo bulshada ee kala duwan ee ardayda iyo qoysaskooda.
4. **Isku dheelitirnayn:** Matalaad yarida ama badanaanshaha ee isirka koox, qawmiyad, lab iyo dhedig, iwm marka lagu barbar dhigo boqolkiiba inta ay ka tahay tirada guud ee dadweynaha.
5. **Kala duwanaansho:** Iskugu jiro aqoonsiyada gaarka ah ee kala saaco shaqsiyaadka iyo kooxaha
6. **Saamayn:** Ku guulaysiga soo saarida natiijo la rabay ama la doonaaye
7. ***Ku qaybgalka:** waxbarida iyo qalabyada waxbarista ee dhiirigeliyo ardayda inay ku adkaystaan shaqada heerka fasalka iyo ay dhisaan xiisaha ardayda oo ku xiran aqoonta iyo dhaqanka iyaga oo aan carqaladaynaynin waxa ay aaminsan yihiin, cida ay yihiin, halka ay ka imaadeen, iyo waxa ay noqon karaan.
8. **Heer sare:** tayo ahaanshaha aad u wanaagsan
9. **Sinaan:** Kor u qaadida guusha ardayda oo dhan, iyo bixinta taageerooyin gaar ah oo lala beegsanaayo iyadoo meesha laga saaraayo saadaalinta isir soocida iyo isku dheelitirnaan la'aanta.
10. **Heerka Fasalka:** qoraalada, hawlaha, iyo qalabyada ku haboon heerka fasalka iyo heerarka u diyaarinta jaamacada iyo shaqada.
11. **Ka mid noqoshada (Kuli, loo dhan yahay):** ficilka isku duubnida, isu keenida, iyo abuurista jawi lahaansho, ixtiraam, iyo qadarinta dhamaan.
12. **Macno leh*:** waxbarida iyo qalabyada waxbarista ee fahmo iyo dhaleeceeyo caadooyinka dhaqameed ee ugu sareeyo iyo eegaayo booska bulsho ee bulshadooda si ay u kobciyaan dareenka u doodista iyo isbedelka.

* laga soo qaatay khayraadka ay soo saartay UnboundEd Learning, Inc.

ct/sg